



## Qofka heysta kaarka Moni-kortti: Soo celinta lacagaha ku jira kaarka Moni-kortti

Waaxda socdaalka ayaa waxaa ay bishii Luulyo ee sannadkaan 2020 u dirtey booliska codsiga ku saabsan in ay baaritaan ku sameeyaan lacagaha ku haray kaarka Moni-kortti. Si kasta oo arrinkaan uu u jiro, haddana waxaad codsan kartaa adigoo raacaya tilmaanbixintan, in lacagahaas laguu soo celiyo, haddii ay wali jiraan lacago aadan helin oo kaaga haray kaarka Waaxda socdaalka ee Moni-kortti.

### **Haddii aad tahay macmiil ka tirsan xerada qaxootiga**

Haddii aad tahay macmiil ka tirsan xerada qaxootiga, waxaad la xiriirtaa xeradaada qaxootiga. Xerada qaxootiga ayaa kaala talineysa, sidii aad u codsan laheyd lacagihii kaaga haray kaarka Moni-kortti.

### **Haddii aadan aheyn macmiil ka tirsan xerada qaxootiga**

Haddii aadan mardambe aheyn macmiil ka tirsan xerada qaxootiga, waxaad iimeyl ku soo dirtaa cinwaankaan [maksukortti@migri.fi](mailto:maksukortti@migri.fi).

Waxaadna farriinta iimeylka ku sheegtaa nambarkaaga macmiilkka ee xarada qaxootiga, iyo in aad codsaneyso in lacagihii kaaga haray kaarka Moni-kortti laguu soo wareejiyo.

Lacagaha ku haray Moni-kortti waxaa lagu soo wareejin karaa oo kaliya kaarka Waaxda socdaalka PFS. Haddii aadan laheyn kaarka PFS, waaxad heleysaa kaar PFS oo kumeelgaar ah, si aad lacagta u hesho.